

Adeegga Qareenimada Caafimaadka Maskaxda Shefiil

Mashruuca Qareenimada Caafimaadka Maskaxda
Shefiil

Rugta Longli
Norwuudh Gareynj Daraayf
Shefiil S5 7JT

Teleefan bilaash ah: 0800 035 0396
Fakis 0114 226 1671
Emayl: smhcab@cabnet.org.uk

Qareenimo sirtaadu xafidantahay, madaxbanaan oo
bilaash ah oo loogu talagalay dadka isticmaala
adeegyada caafimaadka maskaxda dadka qaangaarka
ah ee Shefiil ku nool

Adeegga Qareenimada Caafimaadka Maskaxda Shefiil wuxuu qayb ka yahay Xafiiska Talooyinka
Muwaadinka CAB Ltd ee Caafimaadka Maskaxda Shefiil
Wuxuu ka diiwaan gashanyahay Iglan iyo Weylis – Lambarka Diiwaankuna waa 4275776
H7860 – Somali
Sheffield Mental Health Advocacy Service

Waa maxay qareenimo?

Qareenimadu waxaa weeye inaad hesho qof ku dhinac jooga, oo kaa saacida in codkaaga la maqlo.

Waa maxay Qareenimada Caafimaadka Maskaxda Shefiil?

- Waxaanu nahay adeeg loogu talagalay dadka isticmaala adeegyada caafimaadka Shefiil ee dadka qaangaadhka ah
- Waan ka duwanahay waanuna ka madaxbanaanahay isbitaalka iyo Hay'adda Daryeelka Caafimaadka Shefiil "Sheffield Care Trust" (oo hore loo oran jirey Caafimaadka Bulshada Shefiil)
- Waxaanu kaliya oo ku shaqayn doonaa awaamirtaada iyo rabitaankaaga

Ma damaanad qaadi karno inaad wax u heli doonto sidii aad wax u rabtey – laakiin waxaan hubin karnaa in lagu maqlo

Adeegga Qareenimada Caafimaadka Maskaxda Shefiil waa adeeg gaar ah oo ka tirsan Xafiiska Talooiyinka Muwaadinka ee Caafimaadka Maskaxda Shefiil. Xafiisku wuxuu siiyaa talooyin takhsusle ah isticmaalayaasha adeegga caafimaadka maskaxda.

Haddii aad doonayso inaad wax ka tiraahdo Adeegga Qareenimada, oo aad ama wax fiican ka sheegto ama ka cabato, fadlan la so xidhiidh: Lesley Faithful, Maareeye, Xafiiska Talooiyinka Muwaadinka CAB ee Caafimaadka Maskaxda Shefiil, adigoo kala soo xidhiidhaya ciwaanka warqadaan xaggeeda dambe ku qoran ama e-mayl ugu soo diraya ciwaankaan:

smhcab@cabnet.org.uk

H7860 – Somali
Sheffield Mental Health Advocacy Service

Waxaan kaala shaqayn karnaa:

- Inaad codkaaga ka dhiibato arrin kasta iyo go'aan kasta oo ku quseeya
- Inaad ka hadasho walaacyadaada oo lagaa saacido inaad qorshaysato waxa aad doonayso inaad samayso
- Inaad macluumaad dheeraad ah ka heshid xaaladdaada iyo waxyaabaha kuu furan oo aad kala dooran karto
- Inaad ku baraarugto xuquuqdaada oo aad ogaato sidii aad u Fushan lahayd.
- Iyadoo lagu raacayo shirarka, dib-u-eegisyada iyo ballamada la xidhiidha daryeelkaaga si aad si buuxda uga qayb qaadato arrimahaaga
- In lagaa caawiyo inaad hesho talo sharci ahaaneed takhasus leh oo lagaa matalo arrimaha la xidhiidha Sharciga Caafimaadka Maskaxda
- Inaad samayso cabasho

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama ula kulanto mid ka mid ah shaqaalaha qareenimada, John Price ama Sarah Holmes, fadlan naga soo wac:

taleefankaan bilaashka ah 0800 035 0396

Isniin – Jimce, 9.00subax – 5.00galab

(wakhtiyada kale mashiin baa kaa qabanaya)

Haddii aad tahay bukaan isbitaalka jiifa ama aad tagto rug maalmeed ay leedahay Hay'adda Daryeelka Shefiil, waxaad weydiisan kartaa qof shaqaalaha ka mid ah inuu noola soo kaa xidhiidho. Waxay isticmaali karaan taleefanka gudaha lambarkiisu yahay 61674

0800 035 0396

Taleefan Bilaash ah